Oregon Department of Justice's CIVIL RIGHTS UNIT

# Tilmaamaha Badbaadada ee Ka hortagga Daabacaada Macluumaadka

Daabacaada Macluumaadka: Si giuud oo loo daabaco ama loo wadaago macluumaad shakhsi, gaar ahaaneed, ama ogaanshaha macluumaad ku saabsan qof kale oo laga leeyahay ujeedo xaasidnimo. Inta badan daabacaadani waxay ka dhacdaa internet-ka iyada oo ujeedada laga leeyahay ay tahay in qofka kale la baqdin geliyo, ama haddii kale la cabsi geliyo, aamusiiyo, la daba guro, dhibaateeyo, ama loo hanjabo qofka, ama lagu dhiirigeliyo dadka in ay sidaasi sameeyaan.

## Ilaalinta Ka dhanka ah Daabacaada Macluumaadka ee Shaqaalaha Dowladda

- ☐ Shaqadaada iyo emailka iyo qoraalka la isku diro ee shaqada la xiriira ayay dhici kartaa in ay yihiin sharciyada codsiga diiwaannada dadweynaha.
- ☐ Email/qoraal ha ku dirin shay aadan ku han weynayn in lagu soo daabaco bogga hore ee wargeyska.
- ☐ Cidna email ama qoraal ha ugu dirin lambarka telefoonkaaga gaarka ah, guriga ama cinwaankaaga email-ka, ama magacyada qoyska, qof la isqabo/lammaane, ama carruurta oo ha ka dirin aaladahaaga shaqada.
- ☐ La xiriir waaxyaha IT iyo HR wixii ku saabsan ilaalinta aad heli karto haddii macluumaadka la daabacay 'doxed', oo ay ku jiraan maareynta doorbidida sii gudbinta, haddii ay jiraan fursadaha qoraalo sir ah 'encryption', in macluumaadkaaga laga saaro website-ka hay'ada, qorsheynta dhanka ammaanka ee xafiiska dhexdiisa.

## Badbaadada Warbaahinta Bulshada

- ☐ Sii wad in aad koontooyinka iyo magacyada 'handles' ka dhigto kuwo gaar ah goobaha wax dejinta 'settings'.
- ☐ Koontada ka saar wixii cinwaano, goobaha shaqada ama dugsiga ah, iyo goobaha wax ku yaalaan (ma aha oo kaliya in ay qarsoon yihiin).

- ☐ Ha sheegin meesha aad u socoto, oo ay ku jiraan maqaayadaha/beeraha nasashada/dhacdooyinka iyo degmooyinka/magaalooyinka /gobolada/dalalka.
- ☐ Kaliya aqbal martiqaadyada saaxiibada ee ka socda shakhsiyaadka la yaqaan.
- ☐ Kaliya u oggolow asxaabta la yaqaan in ay arkaan qoraalladaada aad soo geliso.
- ☐ Dib u eeg cidda wadaagi karta qoraalladaada aad soo geliso.
- ☐ Wax ka beddel username-kaaga/magacyadaadu 'handles'.
- ☐ U isticmaal password-yada kala duwan oo adag guud ahaan nidaamyada warbaahinta bulshada.
- ☐ Ha soo gelin sawirro muujinaya wejigaaga ama kuwo kale.
- ☐ Ha soo gelin sawirrada halkaasi oo qof go'aamin karo halka aad joogto/joogtay.
- ☐ Ka nadiifi xogta bixisa xog kale 'meta-data' sawirrada aad soo geliso. Xusuusnow, sawirradaadu waxay muujin karaan goobta aad joogto iyo taariikhda//waqtiga sawirka la qaaday.
- ☐ Ogow halka loo soo sheego daabacaada macluumaadka 'doxing' ama hadal nacayb ah oo ku jira warbaahinta bulshada.
    - Facebook, Snapchat, Twitter, Instagram, Google, Yelp, iwm. dhammaantood waxay leeyihiin shuruudo kala duwan ee sida wax loo isticmaalo.

## Tallaabooyin Dhanka Ammaanka Ah Ka dib Marka La daabaco Macluumaadka Lagugu Aqoonsan karo 'Doxed'

- ☐ Diiwaanka geli waxa dhacaya.
- ☐ Qaad sawirka muuqaalka shaashada 'screenshot' ee wax kasta.
- ☐ Isku day in aad soo raaciso taariikhaha/waqtiyada/username-ka.
- ☐ Tirtir, haddii aad awoodo, balse si degdeg ah u qor marka hore.
- ☐ U soo sheeg booliska haddii ay jiraan hanjabaado. Xaqiiji in aad soo raaciso:
    - Macluumaadka dabaqada la dhowrayo, mid dhab ah ama sida wax loo arko labadaba
        - Dembiyada nacaybka ee Oregon iyo federaalku ma farayaan in uu dembiiluhu si sax ah u aqoonsado dabaqadaada la dhowrayo.
    - Walwalka dhanka badbaadada

**Commented [CJ1]:** Marty, can you please anchor to **Reporting Hate and Bias to the Police** on the toolkit

    - Qoyska/carruurta/lammaanayaasha
    - Safarka
    - Muuqaalada dadweynaha
  - Macluumaad gaar ah oo ku saabsan:
    - Wax soo fool leh: miyuu dembiiluhu ku nool yahay meel dhow?
    - Waa maxay erayada saxda ah ee la adeegsaday? (Hadalo cay ah, hanjabaado, hub)
  - Wixii caddeyn ah, oo ay ku jiraan sawirka muuqaalka shaashada 'screenshot'. Xusuusnow in waqtiyada loogu talagalay warbixintaada ku socota boolisku uu saameyn ku yeelan karo ilaalinta caddeynta.
  - Ogow in "hanjabaadaha dhabta" ee lagu sheego dhanka internet-ka, lagu soo diro boostada, ama lagu sameeyo wicitaan telefoonka ahaan/cod laguugu dhaafo farriintaada codka ay dhici karto in ay yihiin dembi federaal. Samee warbixin ku socota FBI, ama ku dhiirigeli booliska degaankaaga in ay warbixinta u gudbiyaan hay'adaha dhaqangelinta sharciga ee federaalka.
- ☐ Beddel password-yada telefoonkaaga, email-kaaga, iyo koontada warbaahinta bulshada. Xaqiiji in password kastaa kala duwan yahay oo adag yahay.
- ☐ U soo sheeg nidaamka 'platform' oo codso in macluumaadka laga saaro.
  - Codso in astaantaada/magacaaga/macluumaadkaaga lagu daro liiska "isla socoshada dhow" si markaa macluumaadka looga saari karo isla marka ay ka soo muuqdaan meel kale.
- ☐ La hadal qof aad ku kalsoon tahay si aad taageero u hesho. Kali kuma tihid.
- ☐ Oregon's 2021 HB 3047 ayaa bixisa nidaamka sharciga madaniga ah ee daabacadaada macluumaadka 'doxing'. La hadal qareen si aad u ogaato haddii aad leedahay nidaamka sharciga madaniga ah oo dheeraad ah.
  - Barnaamijka Adeega Gudbinta Qareenada Gobolka Oregon
  - Gargaarka Sharciga
  - Xarunta Sharciga ee Dhibbanaha Fal dembiyeedka ee Oregon (OCVLC)
- ☐ Tixgeli Amarka Ilaalinta Madaniga ah
- ☐ Tixgeli macluumaadka aad xakameyn *karto* sida haddii aad ku jirto goobta nidaamka 'platform' haba yaraatee, waxa aad soo geliso, la wadaagista

**Commented [CJ2]:** Marty, can you please anchor to **Protective Orders in Oregon** on the toolkit?

goobta la joogo, iwm, marka loo eego waxa aadan awooda u lahayn in aad xakameyso.

- ☐ Deji google alerts oo loogu talagalay magacaaga, lambarkaaga, cinwaankaaga si aad u hesho digniinaha haddii macluumaad ka soo baxo internet-ka.
- ☐ Isticmaal kala doorashada in aanan wax laga qayb qaadan shirkad xogta ururisa 'data broker'– adeegyada qaarkood waxaa dhici karta in aad bixiso lacag sida DeleteMe, Reputation Defender, Privacy Bee, Kanary, OneRep, OptOutPrescreen.com, Do Not Call Registry.
- ☐ Tixgeli isticmaalida cinwaannada email-ka oo gooni ah oo loogu talagalay ujeedooyin kale.
- ☐ Qorshaha badbaadada:
  - o Marka la joogo shaqada – la hadal HR.
  - o Marka la joogo guriga – samee qorshe cad oo aad la leedahay qoyskaaga, la hadal dadka deriska ah oo aad ku kalsoon tahay, ka codso booliska roondada dhanka ammaanka oo la kordhiyo.
  - o Goobaha bulshada – la safar asxaabtaada, qaado waddooyin beddel ah, u sheeg qof lagu kalsoon yahay halka aad u socoto iyo goorta aad filayso in aad soo noqoto.
- ☐ Kala hadal xubnaha ka tirsan qoyska/asxaabta macluumaadka ay wadaagaan internet-ka ee ku saabsan adiga.

**Ilo Dheeraad ah oo Loogu talagalay Badbaadada Dhanka Internet-ka (meelaha la sii gelayo 'links'oo ku qoran Ingiriisi)**
**Talooyin loogu talagalay sameynta password-yada adag,:**
Badbaadada Internet-ka: Sameynta Password-yada Adag (gcfglobal.org)
Samee Password Adag & Koonto Sugnaan badan – Caawimaada Koontada Google

**Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan badbaadada internet-ka:**
Daabacaada Macluumaadka: Waxa ay tahay iyo sida loo ilaaliyo naftaada | NortonLifeLock
5 Talooyin oo loogu talagalay Ammaanka Baraha Bulshada iyo Asturnaanta | Norton.com

Dib u dejinta Asturnaanta: Tilmaamaha goobaha wax dejinta 'settings' ee muhiimka ah waa in ay isbeddeshaa hadda | Washington Post
Sida naftaada looga tirtiro internet-ka | comparitech
Halkan waxaa ku qoran shirkadaha xogta ururiya 'data brokers' ee sida degan u gadanaya una gadaya macluumaadkaaga gaar ahaaneed | Fast Company
Sida loo Ilaaliyo Xogtaada Oo Macluumaadkaaga Gaarka ah Looga saaro Internet-ka
Lacag la'aan: Tilmaamaha In aanan wax laga qayb qaadan ee aad Naftaada U qabsan Karto oo Lacag la'aan ah 'DIY' | DeleteMe
Sida Aan Looga Soo Muuqan Internet-ka | Reader's Digest

Ka saarida waxyaabo ee Google:
Ka saarida Waxyaabo ee Google - Caawimaad Dhanka Sharciga ah
Ka saar macluumaadkaaga gaarka ah Google
Ka saar macluumaadka la isku aqoonsan karo ama daabacaada macluumaadka 'doxing' ee Google Search

Sharciga Ka hortagga Daabacaada Macluumaadka La isku aqoonsan karo:
War saxaafadeedka Senate-ka Oregon oo Ansixiyay Sharciga Ka hortagga Daabacaada Macluumaadka 'Anti-Doxing'

Macluumaadka u dhexeeya laba dhinac:
App-ka Signal
Whatsapp

**Afeef**: Meelaha la sii gelayo 'links' iyo macluumaadka lagu bixiyay xirmadani ayaa ah kuwo loogu talagalay macluumaad kaliya, mana aha mid dhammeystiran, kama dhigna talo sharci ah kamana turjumayo taageero ama baaritaanka Waaxda Caddaalada ee Oregon ee ku saabsan waxyaabaha la soo saaro oo ganacsi ahaan la heli karo. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan xuquuqdaada iyo fursadahaaga sharci la tasho qareen.